

Dirxiga dabada ku dhasha

Dirxiga dabada ku dhasha waa meelaha 1 sentti dirxi dhan oo cad. Dirxiga dabada ku dhasha halis kuma ahan dadka, laakiin waa dirxi la dhabsado. Faafitaanka dirxiga dabada ku dhasha waxay caadi u yihiin carruuraha da'aada xanaanada dhigata, laakiin sidoo kale carruuraha waaweyn iyo dadka waaweyn oo uu ku faafi karo.

Faafitaanka dirxiga dabada ku dhasha waxay caado u ah calaamadaha sida cuncun dabada afkeeda ah, weliba habeenkii. Faafitaanka dirxiga dabada ku dhasha wuxuu sidoo kale noqon karaa mid aan calaamad lahayn.

Faafitaanka

Faafitaanka dirxiga dabada ku dhasha wuxuu u dhacaa, marka qofku uu liqo dirxiga ugxantiisa. Dirxiga labka ah waxay uga sii gurguurtaan midhicirka weyn dhinaca dabada nawaaxigeeda si ay ugu farcamaan. Ugxantaasi waxay ku sii kala faafaan dadka dhexdooda gacmaha iyagoo ku sii fidinaya intaana waxaa dheer meelaha korkooda ama gogosha sariirta lagu sii gudbinayo. Ugxamahaasi waxay ku keydsami karaan iyagoo faafaya muddo dhowr maalmood ah, amaba wiigaga.

Haddii shaqsiga ay ka soo muuqato calaamado ku habboon faafitaanka dirxiga dabada, dawadiisa waxaa lagu bilaabi karaa iyadoo uunan dhakhtar u tagin. Daryeelka caafimaadka waxaa lala soo xidhiidhayaa, haddii aanan la hubin, su'aashu inay tahay dirxiga dabada ku dhasha.

Faafitaanka dirxiga dabada ku dhasha waxaa lagaga hor tagi karaa gacmaha- iyo musqulaha nadaafadooda oo si wanaagsan loo daryeelo. Cidiyaha waa in aad loo gaagaabiyo. Cidiyaha qaniinidooda iyo faraha in cuntada lagu cuno waa la iska ilaalinayaa, iyo sidoo kale hurdada dirxiga dabada ku dhasha cida qabta gogosha ay ku seexatay.

Daaweynta

Dirxiga dabada ku dhasha waxaa lagu daweyyaa dawada risiid la'aanta lagaga soo gato farmasiga ee pyrviiniembonaattiga- laga sameeyey . Dadka isla gurigga wada dagan (xataa kuwa aan calaamadaha lahayn) iyo kuwa kale ee ay ku soo noqnoqoto/ shaqsiyaadka maqaarkoodu xidhiidhka aadka isugu dhow uu leeyahay, waxay noqoneysaa isku mar in laga wada daweyyo. Dhammaantoodbana waxay ku celinayaan isla daaweyntaas 14 maalmood ka dib.

Daaweynta ka dib

- Gogosha sariirta, dharka hoosta laga xidho, dharka jiifka iyo- alaabtaciyaarta iyo shukumaanada waxaa la dhaqayaa maalinta daaweynta maalinta ku xigta
- dharka hoosta laga gashado waa in maalin walba la badalo.

Nadaafad ahaan waxaa kuugu filan nadaafada todobaadka la sameeyo ee caadiga ah (qolalka huufareyntooda iyo meelaha iyo sidoo kale musqulaha albaabada gacanta laga furo iyo qasabadaha biyaha oo si taxadir leh loo tirtiro).

Waaxda caabaqyada

18.10.2023.

Faafitaankaas waxaa la wargelinayaa isla gogosha lagu seexo shaqsiyaadka ay ku wada seexdeen, ilmaha goobtooda xanaanada ama iskuulka. Haddii ilmaha lagu xaqiijiyo inuu qabo dirxiga dabada ku dhasha, ilmahaas loogama baahna inuu ka maqnaado xanaanada ama iskuulka.

Haddii cuncunku uu kugu sii dheeraado waxaa habboon inaad la xidhiidhid daryeelka caafimaadka.

Hagitaan dheeraad ah THL:ka bogooda <https://thl.fi/fi/web/infektiotaudit-iyo-rokotukset/taudit-ja-torjunta/taudit-ja-taudinaiheuttajat-a-o/kihomato> ja Terveyskirjastosta <https://www.terveyskirjasto.fi/dlk00427>
Fiiri sidoo kale Terveyskirjastoda, caabaqyada iyo xanaanooyinka <https://www.terveyskirjasto.fi/dlk01200>